

ECHO Script

Emergency and Community Health Outreach



Script, Draft 3
Aug 23, 2010

ECHO Show

"Community Action Minnesota"

Finalized Script Deadline: Friday, August 20, 2010

Flesch-Kincaid grade reading level: 7.3 | Total words: 540

-1-
Haddaad doonayso in aad kor iskaga soo qaado faqriga, waxaa jirta meel kuu dhow oo ku caawin karta.

-2-
Waa hayadda kuu dhow oo layiraahdo Community Action. Waxay kuu caawin kartaa siyaabo badan waxayna haysaa adeegyo iyo qorshooyin.

-3-
Minnesota Waxaa ku yaala (28) labaatan iyo sided hay'adood oo ay Community Action leedahay kana shaqaynaya xaafad kasta oo gobolkan Minnesota ku taala. Marka lagu daro (11) kow iyo tobanka gobol oo loo yaqaan deegaanada qabiiliga ah. Midkasta oo hay'addaas ka mid ah magac gooniya ayey leedahay waxayna bixiyaan adeegyo kala duwan.

Way kala duwan yihiin sababtuna waxay tahay hay'ad kasta waxay ka turjuntaa baahidda goonida u ah dadka meeshaas degan

-4-
Laakiin kuligood waa meelo fiican oo aad adeeg u tagi kartid haddii aad caawimaad u baahan tahay.

Community Action waxay u adeegtaa cid kasta ka bilaabata ilmaha dhashay ilaa dadka waaweyn. Waxay dadka caawinayeen in ay ka xoroobaan faqriga ilaa (45) afartan iyo shan sano.

Addeegyadda soo Socda ayaad ka heleysaa ayna ku caan baxday hay'adda Community Action

ECHO Minnesota | 125 Charles Ave., St. Paul, MN 55103 | www.echominnesota.org | 651-789-4337

-5-

Ilmaha Yar-yar

Qorsha Head Starka wuxuu caawiyaa ilmaha aan schoolka gaarin inta u dhaxaysa 3-ilaa 5 sano,

In ay u diyaar garoobaan schoolka. Head Starku wuxuu ka caawiyaa ilmaha aqoonta, nafaqada iyo caafimaadka carruurta iyo waliba qoyskooda.

Carruurta hormar sare ayey sameeyaan schoolka haddii ay caafimaad qabaan ayna diyaar u yihiin in ay waxbartaan.

-6-

Barnamika kobcinta saqiirka waxaa loogu talagalay ilmaha yar oo dhashay ilaa 3 sano iyo dumarka uurka leh

-7-

Barnaamijka ka taakulaynta korontadda.

Barnaamijka korontadda wuxuu kaa caawinayaa in uu kaa bixiyo gaska iyo korontada. Barnaamijkan waa muhiim waqtiga qaboobaha, marka lacagta korontada ay qaaliyowdo.

-8-

Barnaamijka cimilaynta

Barnaamijka cimilaynta waxaa loogu talagalay in uu yareeyo lacagta korontada si cilmiyeysan, iyo siyaabo kale oo yareeya dhibta marka uu qabowga badan yahay gurigaagana kulayl ka dhigaya

-9-

Guryaha Jaban.

Barnaamijka guryaha jaban waxaa laga wadaa apartamatooyinka ama guryaha la raqiisiyey loona raqiisiyey dadka dhaqaalaha yar. Hay'addaha sidoo kale waxay caawiyaan dadka gurya la'aanta ah amaba ay ka hortagtaan kuwa noqon kara gurya la'aanta. Hay'addo badan ayaa ka hortaga in aan guriga lagaa qaadan.

-10-

Caawinta Cuntada.

Barnaamijka cuntada ee dowladda wuxuu caawiyaa dadka dhaqaalaha yar in ay cunto helaan. Waxaa loogu wici jiray Food stamps, laakiin hadda waxaa la isticmaalaa card oo cunto lagu

gadan karo. Qaar ka mid ah hay'adaha Community Action waxay bixiyaan cunto lacag la'aan ah. Ama waxay kuu tilmaami karaan barnaamijka cuntada lacag la'aanta ah oo u dhow deegaankaaga.

-11-

Taageerada dadka waaweyn.

Taageerada dadka waaweyn waxaa ka mid ah cuntada, caafimaadka iyo guryaha jaban oo dadka waaweyn.

-12-

Tababarka adkeynta dhaqaalaha.

Tababarka adkeynta dhaqaalaha wuxuu dadka baraa sida loo maamulo lacagta la iskagana ilaaliyo deynta, keydka lacagta iyo sida loo dhisto creditka. Sidoo kale wuxuu kaa caawinayaa oo ku fahansiinayaa sida lacagta loo isticmaalo

-13-

Xareynta Canshuurta.

Qaybo badan oo ka mid ah hay'ada Community Action waxay kaa caawin karaa xareynta canshuurta ayadoo lacag la'aan ah. Ama waxay kuu heli karaan hay'addo lagu kalsoonyahay oo kaa caawin kara canshuuraha

-14-

Qaar badan oo ka mid ah xarumaha Community Action waxay leeyihiin tababarada shaqadda iyo kuwa kale oo ah caawinta shaqo raadinta. Waxay kaa caawin karaan shaqo raadinta, ama sidii aad ku heli lahayd shaqo ka fiican taad haysatid. Sidoo kale waxay kaa caawin karaan sidaad shaqadaada uu haysan lahayd ayagoo kaa caawinaya qaaditaanka ama caruurta oo lagu hayo

-15-

Si aad uga qayb qaadatid soo booqo xafiiska kuu dhow ee Community Action.

Ku soo dhawow la fariiso lana haddal qof u jajaban in uu ku dhagaysto. Waxaa laguula dhaqmi doonaa si dabacsan waxaana heli doontaa adeeg wanaagsan.

Waxay ogaan doonaan baahidaada kadibna way ku caawin doonaan.

Haddii adeegyadda Community Action aysan baahidaada xalin Karin, waxay isku dayi doonaan in ay kuu helaan adeegyo kale.

-16-

Community Action waxay ku taqasuseen in ay dadka ka caawiyaan sidii ay uga bixi lahaayeen faqriga. Waa meel fiican oo aad nolol fiican aad ka bilaabi kartid.

###